

Midaynta Hab Dhigaalka Af Soomaaliga

 Cabdalla Cumar Mansuur

Mucda Qoraalka

Waxaan halkan ku falanqaynayaa arrimo ka mid ah hab dhigaalka af Soomaaliga ee aan xasillayn oo u baahan in la mideeyo.

Falanqaynta iyo talooyinka aan halkan ku soo bandhigayaa, waxay ku saabsan yihii sidii lagu xasilin lahaa ama lagu midayn lahaa qaar ka mid ah habdhigaalka af Soomaaliga; waxayna qayb ka tahay horumarinta af Soomaaliga xagga habsocodka midayntiisa (standardization) iyo casriyayntiisaba.

1. Hordhac

Laga billaabto 1972 ilaa 1990, waxaa si xawli leh u socday horumarka af Soomaaliga xagga habsocodka midayntiisa (standardization) iyo casriiyantiisaba, maadaama af Soomaaliga waqtigaas si joogta ah loogu adeegsanayay xagga waxbarashada iyo xagga maamulkaba. Xilligan, si hawshaasi u sii socoto, waxaa aad loogu baahan yahay, dib u hirgelinta adeegsiga af Soomaaliga xagga waxbarashada iyo maamulka ka sokow, in wax laga qabto saddex arrimood oo muhiim u ah daryeelka iyo horumarinta af Soomaaliga, kuwaas oo kala ah:

- 1) Midaynta hab dhigaalkiisa
- 2) Midayntiisa xagga afkiisa guud (standard language).
- 3) Kobcinta ereybixintiisa, si loo yareeyo adeegsiga badan ee afafka shisheeye ee weerarka ba'an ku haya af Soomaaliga.

Waxaan rajaynayaa in saddexdan arrimood aan mid mid u falanqeeyo.

Qoraalkan, waxaan isku dayayaa in aan ku falanqeeyo arrimo ka mid ah qodobka koowaad ee ah hab dhigaalka af Soomaaliga ee aan xasillayn oo u baahan in la mideeyo.¹

Kaddib markii uu dhacay burburka qaranka Soomaaliyeed, oo af Soomaaligu agoomoobay, waxaa dadka qaarkood ay bilaabeen in af Soomaaliga ay u qoraan si aan midaysanayn. Saddex qaybood ayaan u kooxayn karnaa Soomaalida sida kala duwan ee ay haatan u adeegsato hab dhigaalka farta af Soomaaliga.

1. Dhallinyaro aan helin fursad ay wax ku bartaan af Soomaaliga, oo adeegsiga internet iyo telefoonka ay ka barteen qorista af Soomaaliga, in yar mooyee, badankoodu higgaadda ayaa dhibta.

2. Aqoonyahanno caadaystay in ay wax ka beddelaan hab qoristii hore ee dhaqangalay.
3. Kuwana waxay ku socdaan habkii hore ee loo adeegsan jiray hab dhigaalka saxda ah.

Haddaba, falanqaynta iyo talooyinka aan halkan ku soo bandhigayo, oo ku saabsan sidii lagu xasilin lahaa ama lagu midayn lahaa qaar ka mid ah habdhigaalka af Soomaaligu waa kuwo u baahan in la sii ballaariyo ama la saxaba, waxaa iyana muhiim ah in cid kasta oo wax qoraysaa isku daydo inay hirgeliso wixii maangal ah.

2. Isqabadsiinta ereyada lammaanan

In kastoo aan hore uga hadlay ereyada lammaanan (Cabdalla 2015:17-35), haddana waxaan dareemay in loo baahan yahay in aan wax ku sii kordhiyo aragtidayda. Sida qof waliba uu dareemi karo waxaa qoraallada af Somaaliga aad ugu batay ereyada lammaanan, oo loo dhexeysiinayo xarriiqin, sida: *raad-raac, dib-u-dhis, naas-nuujin, cilmi-baarlis, hog-a-tus* iwm.

Haddaba, waxaan halkan mid mid ugu qaadaadhigayaa qaababka kala duwan ee ila habboon in ereyada laysku lammaaninayo.

2.1 Ereyo u baahan in loo dhexeysiyo xarriiq

Ereyada lammaanan, intooda badan, looma baahna in loo dhexeysiyo xarriiq, aan ka ahayn marka aan laga maarmi karin adeegsigooda, oo u badan saddexdaan xaaladooda:

- a) Haddii ay isugu yimaadaan laba shaqal halka ay iska qabanayaan laba erey oo laysku lammaaninayo, markaas waa loo baahanyahay in xarriiq loo dhexeysiyo labadaa erey, sida: *waaya-aragnimo, cilmi-afeed.*

- b) Waxaa jira ereyo, sida: *kayd-haye*, haddii aan loo dhexeysiin xarriiqin, ereygaas ku dhawaaqiddiisu way isbeddelaysaa, oo wax kale ayuu noqonayaa, **kaydhaye*, sidaa darteed, waa khasab adeegsiga xarriiqinta. Waa la mid: *haad-haad, mad-hab*.
- c) Marka la qorayo magac shisheeye oo la doonayo in sidiisi loo qoro, loona baahday in lagu lifaaqo qodob, waxaa ila habboon in loo dhexeysiyo xarriiqin, sida: *farta* “Latin”-ka, “link”- iga iwm.
- d) Magacyada raacsan magac sharafeedyada, iyagana waa in loo dhexeysiyya xarriiq, si aan laysku qaldin magac sharfeedka iyo midka aabbaha, sida: Yuusuf-Garaad, Caasha-Kiin, Maxamed-Nuur iwm.

2.2 Ereyada u baahan in loo adeegsado hamsada (').

Hamsada, oo ah shibbane ka mid ah dhawaaqyada hadalka, waa aamus yar. Dhawaaqaasi wuxuu dhashaa kolka xargaha codku ay si degdeg ah u xirmaan, oo xiisadda dabaysha u joojiyaan, degdegna u furmaan, sida: *go'aan, bi'id, lo'*. Haddaba ereyada lammaanan ee habboon in loo adeegsado hamsada waxaa ka mida ah: *mala'awaal, ab'ogaa, lo'doon*, iwm.

2.3 Ereyada lammaanan ee aan u baahnayn in xarriiq loo dhexaysiyo

Ereyada lammaanan badankoodu uma baahna in loo dhexeysiyo xarriiqin, maxaa yeelay, ereyadaas haddii aan isku dhejinno wax isbeddel ah ee ku dhacayo haba yaraatee ma jiraan, bal waxaaba fududanaya qoristooda, sida:

raadraac, dibudhis, naasnuujin , dhabarjab, meelmarin, hogatus iwm.

Sidaas oo kalena in la yeelo magacyada gaarka ah, sida:

Baargaal, Dhagaxbuur, Laascaanood, Beledweyne, Buurhakaba.

Afafka kale ee adeegsada farta Latin-ka, ayaa, si caadi ah u xiriiriya ereyada lammaanan, sida afafka Jarmalka, Swedesh-ka iyo kuwa kaleba, oo dhigaalkooda ay ka buuxaan ereyo lammaanan, oo aan xariiqna loo dhexeysiinayn. Tus.:

Jarmal: *der Stadtteil* – xaafadda magaalada

die Stadtteilzeitung – wargeyska xaafadda magaalada

Swedesh: *yrkesskolor* – dugsiyada farsamada (vocational schools)

Xitaa af Soomaaligu wuu leeyahay ereyo ka kooban in ka badan labo erey, sida:

dabagaalle (dabo +gaal +leh)

gacankudhiigle (gacan+ku+dhiig+leh)

bukaansocodeegto (bukaan+socod+eegto)

kumeelgaard (ku+meel+gar)

waxsoosaar (wax+soo+saar)

2.4 Ereyada lammaanan iyo isbeddelka shaqallada.

Haddi erey ku dhamaado shaqalka **-o** ama **-e**, lagu lifaaqayo erey kale, oo ka billaabmo shibbane, labadaa shaqal waxay isu rogaan shaqalka **-a**. Sida:

*biyo+mareen> biyamareen, lafo+gur> lafagur, dabo+gaalle>
dabagaalle, dhego+culus> dhegaculus, tabo+bar> tababar,
bare+kaaliye>barakaaliye aabbe+yaal> aabbayaal iwm.*

Xitaa markii aan laysku lammaanin waa la mid, sida:

ilma adeer (ilmo adeer), u dhega nuglow (u dhego nuglow) iwm.

Arrinta isasaamayntan waxaa la xeer ah, markii magac uu ku dhammadho shaqalladaas (-o / -e) lagu lifaaqo qodob ama lifaaq wadareed, (Cabdalla & Puglielli 2018:38,33). Tusaale:

bare+ka>baraha, kabo+ka>kabaha, qore+yaal>qorayaal

2.5 Xarfaha laballaabma iyo ereyada lammaaan

Qaar ka mid ah ereyada ku dhammaada shaqalka *-e/-o*, oo lagu lifaaqayo erey kale, oo ka billaabma shibbanayaasha laballaabma, inta badan waxaa la dareemayaa in shibbanayaashaasi ay laballaabmaan, Tus.

*Labo+laaban>laballaaban, dhego+nugul>dhegannugul, ku
talo+gal> ku talaggal, ka+dib> Kaddib², lee+nahay >leennahay .*

Hasayeeshee, waxaa la caadaystay, inta badan, in hal shibbane laga dhigo (qalad ma ah, waase laga fiican yahay). Ifafaalahan oo kale waxaa la wadaaga afaf kale, sida:

af Talyaaniga (di+la = della, di+lo = dello),

af Ingiriisiga (up+er = upper, shop+ing=shopping, write+en = written).

2.6 Habka loo qoro magaca “af Soomaaliga”

Waxaa kaloo aan lagu midaysnayn xitaa dhigaalka magaca “af Soomaaliga”, oo siyaabo badan, oo kala duwan aan u kala qorno, sida:

Af-soomaaliga, Afsoomaaliga, af soomaaliga, af-soomaaliga, Af Soomaaliga,Af-Soomaaliga, af-Soomaaliga, af Soomaaliga iwm.

Haddaba, habkan kala duwan, waxaa ila habboon in la adeegsado qaabka midka ugu dambeeyaa (oo ah *af Soomaaliga*), maxaa yeelay:

- a) Ereyga *af* waa magac guud, oo uma baahna in xaraf weyn lagu bilaabo, laakiin ereyga ‘*Soomaali*’ waa magac gaar ah, oo loo baahan yahay in xarafkiisi hore la weyneeyo.
- b) Laba magac oo mid guud yahay midka kalena gaar yahay in laysku lammaaniyo caadi ma aha, in la kala saaro ayaa habboon, sida:
far Soomaali, canjeero Soomaali, xeer Soomaali, aqal Soomaali, af Carabi, af Jarmal.

Waxaase laysku lifaaqaa marka labadu ay yihiin magac guud ama magac iyo fal, sida:

afguri, farbaro, afhayeen, aftahan, xeerjajab, baadigoob iwm.

- c) Xarriiqinta loo dhexeysiinayo, arrintaasi, sida aan korba ku soo caddaynay, waxaa adeegsigeeda habboon, marka aan laga maarmi karin, sida afarta xaaladood ee aan kor ku soo xusnay (eeg # 2.1).
- d) Labadaa magac (**af Soomaaliga**), inkastoo aan u kala dhignay sababta aan kor ku soo xusnay, lama mid aha marka aan leenahay ‘**afka Soomaaliga**’, maxaayeelay labadan magacba waxay leeyihiin qodobbo, waxayna yihiin koox magaceed, laakiin midka hore kale (**af Soomaaliga**) wuxuu u dhaqmaan sida magac lammaanan, qaabka lammaanyaasha ayuuna raacaa, oo ereygiisi hore (**af**) qodob ma raaco, ereyga labaad uun baa la raacsiiin karaa qodobka (**af Soomaaliga**), markaasna, caynta qodobku waxay waafaqdaa magaca hore cayntiisa. Haddii caynta magaca hore ay tahay lab, qodobka magaca labaad cayntiisu waa lab, xitaa haddii uu magacaasi yahay dheddig; haddii midka hore uu yahay dhaddigna waa la xeer. Tus.

Gaarigacanka (gaariga gacanta),

lafdhabarta (lafta dhabarka),

far Soomaalida (farta Soomaaliga).

Intaa waxaa sii dheer, xitaa falku wuxuu mar waliba la jaanqaadaa magaca hore, oo loo yaqaan *magac madaxeed* (nominal head). Tus. *Gaarigacanku wuu jabay*. Inkastoo ereyga labaad uu yahay magac dheddig (*gacanta*), haddana lama oran karo: **gaarigacantu way jabtay*.

Illayn gacantu ma jamine, gaariga ayaa jabay, sidaa darteed ayaa caynta falka iyo qodobkuba ay u raacsan yihiiin caynta magaca *gaariga*, ereyga *gacanna* waa uun *faahfaahiye* (modifier) (Cabdalla & Puglielli 1999: 211-228).

3. Midaynta adeegsiga shaqallada

Mararka qaarkood waxaa laysku qaldaa adeegsida shaqallada, waxaana ka mid ah meelaha soo socda.

3.1 Shaqallada *a/e, e/a*

Mararka qaarkood, waxaa laysku qaldaa adeegsiga shaqallada “a” & “e”. Waxaa halkan tusaala ahaan ku soo bandhigayaa ereyo dadka qaarkood ay u adeegsadaan xarafka “a”, haseyeeshee ku habboon in loo adeegsado shaqalka “e”, sida ku cad qaamuusyada Soomaaliyed (Yaasiin 1976, Puglielli & Cabdalla 2012, Adaan Xasan Adan 2013)

maya (-a)	haa (-e)
<i>Wayn</i>	<i>weyn</i>
<i>Eray</i>	<i>erey</i>
<i>magafe</i>	<i>magefe</i>
<i>Wali</i>	<i>weli</i>

3.2 Mararka qaarkoodna, waa lidka habkaa kore, oo halkii shaqalka “a” looga baahnaa ayaa shaqalka “e” loo adeegsadaa. Qofkii oo ku dhawaaqaya “a” ayaa wuxuu qorayaa “e”.

maya (-e)	haa (-a)
<i>Aaden</i>	<i>Aadan</i>
<i>Waxey</i>	<i>Waxay</i>
<i>bareyaal</i>	<i>Barayaal</i>

3.3 Xitaa dibkabaha -ay ee falalka tagtada ah, looma baahna in loo qoro -ey, sida:

haa (-a)	maya (-e)
waan cunay,	cuney
waad cuntay,	cuntey
wuu cunay,	cuney
way cuntay,	cuntey
waan cunnay	cunney

3.4 Inkastoo ay jiraan falalka isrogrogga 2aad ee salkoodu uu ku dhammaado shaqallada -i ama -ee, oo ay yara saamayn karaan. codayn ahaan, shaqalka dibkabaha falka tagtada ah (-ay), sida falaka: kari (kariyey), samee (sameeyey), haddana, waxaa ila habboon in aan la beddelin shaqalka -a ee dibkabaha tagtada (-ay), oo sidiisa loo daayo, si xitaa dadka aan aqoon dheeraad ah lahayn aan dhibaata kala kulmin isbedbeddelka shaqalkaas, loona helo hab midaysan. Aragtidani waa mid qoladayada Xarunta Cilmibaarista Soomaaliyeed ee Roma aan la wadaagno Mustafa Fayruus (2015: 54). Tus.

Waan sameeyay, wuu kariyay.

3.5 Sidoo kale, magac faleedyada ka soo jeeda falalka isrogrogga 2aad b, ee fal amarkooda ku dhammaada dibkabaha -ee (sida: samee), waxaa inta badan dibkabe looga dhigaa: -ayn/-eyn (sida: samayn/sameyn). Arrintanna si loo mideeyo waxaa ila habboon, sida horayba u soo jeediyay Mustafa (2015:53), in la adeegsado dibkabaha -ayn. Qaabkan ayaana ku qoran qaamuusyada.

Fal amar	Magac faleed (Haa)	Magac faleed (Maya)
<i>Samee</i>	<i>Samayn</i>	<i>sameyn</i>
<i>Kaxee</i>	<i>Kaxayn</i>	<i>kaxeyn</i>
<i>Eedee</i>	<i>Eedayn</i>	<i>eedeyn</i>
<i>Caddee</i>	<i>caddayn</i>	<i>caddeyn</i>

3.6 Magacuyaalka dhiman ee yeelaha ah, qofka 3aad ee dheddigga (*ay*), isna in aan laga dhigin *ey* ayaa habboon, xitaa markii uu isku lifaaqo erey kale. Tus.:.

Haa (ay)	Maya (ey)
<i>Yeel, si ay wax u barato</i>	<i>Yeel, si ey wax u barato</i>
<i>Gabadhu way (waa+ay) tagtay</i>	<i>Gabadhu wey tagtay</i>
<i>Waxay (waxa+ay) tagtay guriga</i>	<i>Waxey tagtay guriga</i>
<i>Buug ayay (ayaa+ay) qortay</i>	<i>Buug ayey qortay</i>

3.7 Sidoo kale, waxaa jira ereyada ku dhex jira alan ku dhammaada xarfaha *-ey/-ay* ama *-aw* (oo loo yaqaan “diphthong”), oo ah marka *ay* is qabtaan shaqal iyo mid ka mid ah labadan xaraf (-y/-w) midkood, waxaa habboon in aan laga dhigin shaqal dheere, sida ay yeelaan lahjadaha qaarkood. Tus. (Cabdalla 1977: 15; 2018):

<i>Deynta = deenta</i>
<i>Hawl = hool</i>
<i>Weyn = ween</i>
<i>Qayb = qeeb</i>
<i>Culays = culees</i>
<i>Khayr = kheer</i>

4. Midaynta adeegsiga shibbanayaasha qaarkood

Mararka qaarkood waxaa laysku qaldaa adeegsida shibbanayaasha, waxaana ka mid ah meelaha soo socda.

4.1 Shibbanayaasha: *kh* & *q*

Dad badan ayaa isku qalda adeegsiga labadan xaraf, waxaana u badan dhallinta ka soo jeedda degaannada Koonfurta Soomaaliya. Ereyada ku jira xarfahaas laysku qaldayo waxay badankoodu ka soo jeedaan af Carbeedka.

- a) Dhammaan ereyada Soomaaliyeed ee ku jira xarafka *kh* waxay asal ahaan ka soo jeedaan af Carbeedka, sidaa darteed codka xarafka *kh* (خ) waa mid ku soo biiray af Soomaaliga, ugana yimid xagga af Carabeedka, una soo maray waddada diinta iyo dhaqan magaalo, sida: *khayr*, *khasnad*, *Khadiija* iwm. Qaamuuska af Soomaaliga (Puglielli & Mansuur, 2012) waxaa ku jira in ka badan 330 erey, oo ku billaabma xarafka *kh*, giddigooduna af Carbeedka ayay ka soo jeedaan. Tiradan kama mid aha ereyada kale ee dhexda uga jira ama ku dhammaada xarafkaas, sida: *shiikh*, *bakhti* iwm.
- b) Inkastoo jira xarafka “*q*” codkiisi uu ka mid yahay af Soomaaliga, waxaa jirta in ereyada qaarkood ee ku jira xarafkaas ay asal ahaan ka soo jeedaan af Carbeedka. Laba dhawaaq ayayna ka soo jeedaan ereyadaas. Kuwa asalkooda Carbeed uu ahaa qaaf (ق), sida: *qalbi*, *xaq* iwm ah iyo kuwa aslakooda Carbeed uu ahaa codka xarafka (خ), oo af Soomaaligu aan lahayn codkaas, waxaa loo bedelay dhawaaqa xarafka qaaf (q), sida: *qalad* (غلط), iwm.

Waxaa lagu kala saari karaa adeegsiga labadaa xaraf (*kh/q*), adigoo la kaashanaya af Carbeedka, haddaad wax ka taqaan, ama qaamuusyada Soomaaliyeed.

Haddaba, waxaa habboon in xarafka *kh* aad u adeegsato ereyada asal ahaan ay ka soo jeedaan ereyo Carbeed ee leh xarafka *kh*, sida:

	Haa	Maya
خديجة	Khadiija	Qadiija
خير	khayr	qayr
خميس	khamiis	qamiis
خزنة	khasnad	qasnad

Xarafka *q* na in aad u adeegsato ereyda kale ee ka soo jeeda ereyada Carbeed ee leh xarafka qaaf (ق) ama (خ), sida:

	Haa	Maya
قبيل	qabiil	khabiil
قلب	qalbi	khalbi
غلط	qalad	khalad ³
غفلة	qaflad	khaflad

In arrinta laysku qalda xarfaha *kh/q* ay u gaar tahay ereyada ka soo jeeda af Carbeedka waxaa muujinaya ereyada Soomaaliyeed ee aan ka soo jeedin af Carbeedka, oo ku jira xarafka *q*, sida: *qod*, *aqal*, *qoor*, *baaq*, *quun*, *qori iwm*, waa adagtahay in xarafkaa laga dhigo *kh*:: **khod*, **akhal*, **khoor*, **khuun*, **khori*. Waase dhacdaa in Soomaalida ku hadasho lahjadda Banaadirigu ay u adeegsadaan xarafka *kh* ereyadaas qaarkood.

4.2 Shibbanayaasha isa Saameeya

Waxaa kale oo jira qaar ka mid ah ereyada isku midka ah oo dhigaalkoodu uu kala yara duwan yahay, oo badankoodu ay yihiin kuwa shibbanayaashoodu ay isasaameeyeen, sida:

A	B
- <i>ng-</i> (<i>hingo</i>)	- <i>gg-</i> (<i>higgo</i>)
- <i>rn-</i> (<i>furnay</i>)	- <i>rr-</i> (<i>furray</i>)
- <i>ln-</i> (<i>dilnay</i>)	- <i>ll-</i> (<i>dillay</i>)

Ereyada labadan kooxood, kuwa leh xarfaha ku taxan safka A, oo tusaale ahaan aan raacsinnay ereyo qaarkood, ayaa habboon in qoraal ahaan la raaco, sida aan ku qornay qaamuuska (Puglielli & Cabdalla, 2017: xvi). Qaabka kale ee ku taxan qaybta B, inkastoo aan qalad ahayn, in qoraal ahaan loo adeegsanin baa habboon si loo sii socodsiiyo habsocodka midaynta af Soomaaliga guud (standard language).

4.3 Shibbanayaasha laballaabma ee laga tagay

Waxaa jira qolya caadaystay in ay laballaabaan xaraf aan la laballaabi jirin, sida: *iyyo, affar, gabadhdha*. Waa jirtaa in giddi shibbanayaasha af Soomaaligu ay laballaabmaan, , laakiin 7 ayaa laga doortay, maxaayeelay iyagaa ku badan ereyo isu eg oo ku kala duwan, micna ahaan, marka shibbanayaashaasi ay laballaaban yihin iyo marka aan laballaabanayn, sida: *carab & carrab, xabad & xabbad*. Waa ereyo micnoohooda aanu is lahayn, laakiin kuwa kale, inkastoo dhawaaq ahaan ay laballaaban yihin, ma jiraan ama waa dhif ereyo isu eg oo lagu wareerayo micnahooda, sida kuwa aan kor ku soo xusnay. Tus.:

iyo & iyyo, afar & affar, gabadha & gabadhdha iwm.

Maadaama xarfahan laballaabiddooda iyo laballaabid la'aantoodu aanay keenayn wax farqi ah, waxaa la doorbiday in aan waqtì layskaga luminin laballaabiddooda, iyadoo la tixgelinayo xeerka alifba'da oo ka mid ah in la dhaqaaleeyo lana fududeeyo habdhigaalka.

4.4 Shibbanayaal laga maarmay

Sidoo kale, waxaa jira shibbanyaal aan la qorin, isla markiina codadkoodu waxay ka mid yihin codaynta (Somali phonetics), waxaana ka mid ah: *p* [p], *th* [θ], *ng* [ŋ], *gh* [ɣ]. Tusaale, ereyga *dab* xarafkiisa *b* halkan sida *p* ayaa loogu dhawaaqaa (*dap*), haddana, *dab* & *dap*, ma kala laha micna kala duwan, waxaana asal ah “phoneme”-ka /b/, laakiin xarafka /-p/ oo aan marna u kaynayn ereyga micne kale, isla markiina aan marna laga helayn

erey bilowgiisi waa laga maarmay. Arrintanna waxaa la wadaaga xarfaha kale ee kor ku xusan, sida ku cad tusaalooyinka soo socda.

Qoran ma qorna waa isku micne

- ***Bad /b/*** *dap / ڏ / (dap ~ dab)* (la mid: apaal, xEEP..)
- ***Dal /d/*** *etheb / ڏ / (etheb ~ edeb)* (l.m: atheer, ithin..)
- ***Nal / n/*** *fangka / ڱ / (fangka ~ fanka)* (l.m: faanka, sanka)
- ***God /g/*** *Goghol / ڱ / (goghol ~ gogol)* (l.m.: hoghol, aghab)

Xarfahan iyo 14ka shibbane ee laballaabma ee aan la qorin waxaa looga tagay si loo fududeeyo, loona dhaqaaleeyo alifba'da. Badanaa, waxaa laysku qaldaa: farta iyo cilmiga codaynta (phonetics) ee afka.

Bal toddobadii shibbane ee hore aan ku kaaftoonno laballaaabiddooda lagama maarmaanka ah, oo aan saxno adeegsigooda; waayo iyagaaba la kari la'yahay higgaaddooda, oo qaladaadkoodu uu noqday midka ugu badan xagga higgaadda, sida:

*ku *aadan (ku aaddan), *dhamaan (dhammaan), *hadii (haddii),
*bandhiga⁴ (bandhingga), *xaflada (xafladda) iwm.*

5. Habdhigaalka asalraaca ah

Waxyaabaha qaranjabka kaddib soo ifbaxay, waxaa ka mid ah: dad u arkay in lagu xallin karo jahawareerka xagga dhigaalaka in af Soomaaliga loo kala saaro: (a) Af qoraalka u gaar ah, iyo (b) Af hadalka u goonniya (af-guri). Waxayna u qaateen in midka la qorayo uu yahay in ereyada qaarkood loo kala dhigdhigo sida naxwe ahaan uu asalkiisi ahaa, iyagoo wax ka beddelaya habkii hore ee la caadaystay, sida laga dareemaayo tusaalayaasha soo socda, oo aan ka soo xigtay Xaaji Raabi (1977:12, 17):

Qaababka kala qoridda	Qaabka caadiga ah adeegsada
<i>Farriin baa ay ii sheegtay Caasho</i>	<i>Farriin bay ii sheegtay Caasho</i>

Ku ma baa aad tahay?	Kumaad tahay?
ha se ahaato ee	Hase ahaatee
Guriga ayaa ay na tagtay	Guriga ayayna tagtay

Habka kala qoridda, ama kala dhigdhiguddu, haddi cilmi-afeed ahaan aan u eegno waa sax, ereyadaas la madmadoobeeeyay asalakoodu sidaas ayay ahaayeen. Arrintani waa falanqayn cilmi-afeed (linguistic analysis), oo jaamacadaha lagu barto. Haddaba waxaa lays weyddiin karaa arrimaha soo socda.

- 1) Dadweynaha badankooda aan aqoon u lahayn cilmi-afeedka, sidee buu ku garan karaa ereyadaas kala saariddoda? Illayn farta looma samayn qof jaamici ah oo keliya e. Marka af loo yeelaayo far gaar ah, shuruudaha ugu doorka roon ee lagama maarmaanka ahi waa in la fududeeyaa, lana dhaqaaleeyaa, si cidda aan aaqoon lahayn ay si fudud u adeegsan karto farta.
- 2) Haddii aan kala dhigayno qaybaha hadalka, maxaa qaarna loo kala qaybiyay, kuwana loo daayay sidooda? Illayn ereyo badan ayaa kala qaybsamaya, sida; *waan ladanahay <waa aan ladan ahay>*, *waa lagu arkay<waa la ku⁵ arkay>*.
- 3) Maxaan ka yeelnaa xarfaha isasaameeya, sida magac oo markii la raacsiiyo qodob ama dibkabe lahaansho, tus. *bare+ka*, ma waxaan u qornaa *bareka/bareha/ baraha?*
Sidoo kale, *buuggaaga* ma waxaan u qornaa *buug kaaga?*
- 4) Ereyada weerahan soo socda, ma u kala dhigdhigi karnaa, sida aan ku soo aragnay kuwa kore?
*Yuusan cunin (*Yaa uu(s) aan cunin)*
*Miyuusan cunin ? (*Miyaa uu(s) aan cunin?)*
Wayba ka daran yihiin kuwii hore, oo qaabkoodu caadi ma aha.

5) Af walba ee qoran wuxuu leeyahay halbeeg ama raadraac loo cuskado, af Soomaaligana waxaa halbeeg ama raadraac u ah suugaanta leh tix iyo tiraab, oo xambaarsan af Soomaaliga “toolmoon”. Haddii aan raacno aragtidan asalraaca ah, sideen ka yeelnaa marka aan qorayno suugaanta? Sida aan ka warqabnana, maansada Soomaaliyed waxay ku salaysan tahay labo shay: miisaan iyo qaafiyad. Gaar ahaan baydka gabayga, miisaankiisu waa 20/21 shaqal, intaa kama badnaan karo kamana yaraan karo. Waxaa hogatus ahaan u soo qaadanaynaa baydkan gabay ee soo socda (oo uu tiriyay Ina Cabdulle Xasan), oo mar aan u qorayno habkii hore, marna habka asalraaca ah.

*Nin xishood leh **baan** ahay **haddaan** - **lays** xisdiyahayne
Habka caadiga ah = 20 shaqal*

*Nin xishood leh **baa aan** ahay **haddii aan** - **la is** xisdiyahayn **ee**
Qoraalka asalraaca ah = 25 shaqal*

Sida muuqata, baydkani, markii la kala saarsaaray ereyadiisa, wuxuu noqday wax aan gabay ahayn, oo miisaan ahaan jaban.

Haddaba, xalku ma wuxuu noqonayaa in dhigaalka maansada loo daayo qaabkii hore, qoraallada kalena aan ku qorno asalraaca? Sow ma habboona in afku uu yeesho hal hab dhigaal oo keliya?

Dad ayaa ku marmarsooda, iyagoo leh: “Maansadu in ay sidaa ahaato waxaa ku khasbaya miisaanka ay ku dhisan tahay”. Hadday sidaas tahay, sheeka dhaqameedyaduna ma miisaan ayay ku dhisan yihiin, oo yaa weligii maqlay odayaal leh, iyagoo sheekaynaaya:

“*Dhurwaagii baa hadlay, oo waxa uu ku yiri libaaxii...*”

Dawacadii baa waxa ay tiri: “Qaalinka bar waa aad ku qadayn...”

Afafka dunida, markii laga eego xagga sarfaha, waxay u kala baxaan:

- 1) Afafka ereyadoodu isku dhegaan (*agglutinative language*), waxaa ka mid ah afafka, Barbar, Turkishka, Finland, Soomaaliga. Tus.:
Af Finish: *kirjani = buuggayga* (*kirj=buug, ni=kayga*)
Af Soomaali: *buuggayga* (*buug+kay+ga*)
- 2) Afafka ereyadoodu isrogroogaan (inflectional language), waxaa ka mid ah afaf badan, sida af Carbeedka, Talyaaniga, Soomaaliga. Tus.:
Af Soomaaliga. *cun > cunaysa, cunayaa; nin > niman.*
- 3) Afafka ereyadooda kala qoqoban yihii (isolating language), waa afaf aan lahayn sarfe. Afafka Shiinaha iyo Vietnam ayaa ka mid ah.

Haddaba, af Soomaaligu kama mid aha qaybta saddexaad (af ereyadiisi kala qoqoban yihii), waa af is rogropa, ereyadiisana ay is qabsan karaan. Taas micnaheedu ma aha in laysku dhejin karo ereyo kasta. Waxaa jirta kuwa haddii laysku lifaaqo keeni kara wax aan la fahmayn ama aanu caddayn qaab naxweedkoodu. Arrintan waan ku raacsanahay Xaaji Raabi (1977:11, 25), sida aan ka arkayno tusaalooyinkiisa soo socda:

**Cali bay salaamay* (*Cali baa i salaamay*)

**Caliyay keenay* (*Cali baa i keenay*)

* *Ninkoo hadlaya ayaan imid* (ninka oo hadlaya ayaan imid)

Sidoo kale, ereyada “*wax & waxa*” isku si looguma dhejin karo erey kale.

Wax aan *arkay ma jiro* (looma qori karo **waxaan arkay ma jiro*)

Wax baan *arkay* (looma qori karo **waxaan arkay*)

Waxaan arkay Cali (waa sax: *waxa+aan = waxaan arkay Cali*)

Laakiin weeraha soo socda, naxwe ahaan iyo micna ahaanba, waxba kama jabno, waxayna waafaqsan yihii afka guud ee la adeegsado.

Wuxuu doonayaa inuu ku arko

Warqad iyo qalinba ma hayo,

Hase yeeshee, ninna ma imaan

Waxaan ku soo gunaanadayaa arrintan saddex su'aaladood.

- a) Ma jirtaa cid haatan sidatan u hadashaa (*Farriin baa ay ii sheegtay Caashi*)⁶?
- b) Habka kala dhigdhigiddu ma wax buu u taraya afka iyo adeegsigiisa?
- c) Maxay tahay dhibaatada ka imaanaysa in aan ku wadno habdhigaalkii hore oo ku jaango'an sida maanta loogu hadlo af Soomaaliga?

Jawaabtoodu waxay ila tahay waa wada maya. Waxyaabaha uu hab dhigaalkii hore, ee hanaqaaday, uga faa'iido badan yahay midkan dambe, ee asalraaca ah, waxaa ka mid ah:

- (1) fahamkiisa iyo adeegsigiisu kuma adka dadkoo idil (mid aqoon leh iyo mid aan lahaynba);
- (2) wuxuu ku fiican yahay xagga beekhaameynta qoraalka;
- (3) wuxuu waxtar weyn ku leeyahay midaynta af Soomaaliga.

Haddii ula jeeddadu ay tahay in la kala saaro afka la qorayo iyo afka lagu hadlo, waa arrin kale, oo sidatan ma aha. Mindhaa, waxaa laysku qaldayaa hab dhigaalka iyo waxa loo yaqaan “afka guud” (standard language). Markii la helo afka guud ayaa loo adeegsadaa laba hab: hab qoraal & hab tiraab/hadal ah.

- a) Afka qoraal ahaan loo adeegsado waa af si hufan loo diyaariyo, iyadoo aad looga fiirsanayo xulashada ereyda iyo qaabdhismedka naxwaha ee saxda ah, qurxinayana farriinta la doonayo in lagu gudbiyo.
- b) Af tiraab ama midka lagu hadlo waa mid loo adeegsado ereyo caadi ah iyo weero fudfudud, oo mararka qaarkood dad ka fakada qaab naxweed aan loo fiiran, ama ku laran qaab lajhadeed.

Haddaba, arrintu ma aha hab dhigaalka ee waa kala saaridda afka guud iyo lajhadaha⁷.

6. Hab dhigaalka magaca gaarka ah

Qaranjabkii kaddib waxaa batay in dadka qaarkood ay bilaabeen in magacyada gaarka ah loo qoro siyaabo kala duwan, gaar ahaan magacyada ka soo jeeda af shisheeye. Si loo mideeyo habqoraalka magacyadaas waxaan ku talinayaa:

- 1) Magaca ajnabiga ah ee ku qoran farta “Latin”-ka, waxaa habboon in loo qoro sida uu yahay, isagoo aan la Soomaaliyeyn, xitaa haddii uu khilaafsan yahay habka codaynta ama qorista af Soomaaliga, sida:

Andrzejewski, John, Bruxelles, New York, Venezuela, Kenya.

Waxaase jira magacyo ajnabi oo waa hore la Soomaaliyeeyay oo loo baahan yahay in loo qoro sida ay Soomaalidu ugu dhawaaqdo, waxaana ka mid ah magacyadan:

Maraykan (America), Talyaani (Italia), Itoobiya (Ethiopia).

- 2) Magacyada Soomaaliyeed waxaa ku jira magacyo asalkoodu ka soo jeeda af Carbeedka, saddex siyood ayayna af Soomaaliga ugu mid noqdeen, iyagoo loo qorayo sida ay Soomaalidu ugu dhawaaqdo:

a) Kuwo sida asalkoodu ahaa loogu dhawaaqo, waxaa ka mid ah:

Haaruun, Hinda, Khadiija, Cali, Yuusuf, iwm.

b) Kuwo isbeddel codeed yar ku dhacay, sida:

Ibraahin (af Carbeedka: Ibraahim), *Xuseen* (Xusseyn), *Axmed* (Axmad), *Aadan* (Aadam), *Maxamed* (Muxammad).

c) Kuwo isbeddel weyn ku dhacay, oo siyaabo kala duwanna loogu dhawaaqo gobollada, sida magaca Carbeed “Abuu Bakar” oo noqday: *Abokor, Abuukar, Abiikar, Eybakar, Bakar, Iikar*; sidoo kale magaca “Cabdullaahi” isna wuxuu noqday: *Cabdulle, Cabdille, Cabdalle, Cabdalla, Cabdullaahi, Cabdillaahi*.

Haddaba, nidaamkan aan kor ku soo xusnay, oo waafaqsan codaynta af Soomaaliga, oo horeyna u dhaqangalay, ilama habboona in la beddelo, laguna qoro hab Carbeedka asalka ah, sida dadka qaarkood ay billaabeen in magacyadooda ay u qoraan, Tus.:

Habka codaynta Soomaaliyeed	Habka codaynta Carbeed
<i>Xuseen</i>	*Xuseyn (Carabiga saxda ahina waa Xussayn)
<i>Aadan</i>	Aadam
<i>Maxamed</i>	Muxammad

Haddii aan raacno aragtidan asalraaca ah, maxaan ka yeelnaa magacyada, sida kuwa asalkooda ka soo jeeda “Abuu Bakar” (*Abokor, Abuukar, Abiikar, Eybakar, Bakar, Iikar*)? Giddigood ma “*Abuubakar*” baan u qornaa? Sidoo kale, sideen ka yeelnaa magacyada Carbeed ee qaarkood khilaafsan yihii codaynta af Soomaaliga, sida: *Zaynab* (*Saynab*), *Cuthmaan* (*Cismaan*), *Caa'isha* (*Caasho*)? Ma qaabkaa Carbeed ayaan u wada qornaa? U malayn maayo in ay sax tahay arrintan. Illayn waxaa jira boqollaal erey Soomaaliyeed oo asalkoodu ka soo jeeda af Carbeedka, oo codayn ahaan la Soomaaliyeeyey, iyagana maxaan ka yeelnaa, sida ereyada soo socda?

<i>Carabi</i>	<i>Soomaali</i>
<i>thuum</i>	(<i>toon/tuun</i>)
<i>tamr</i>	(<i>timir</i>),
<i>ibrah</i>	(<i>cirbad</i>)
<i>ṣowm</i>	(<i>soon</i>)
<i>calam</i>	(<i>calan</i>)

Ma habboona in codaynta af Soomaaliga aan beddelno. Af waliba wax buu ka soo ergadaa af kale, haseyeshee wuxuu ku dabbaqaa codaynta afkiisa (eeg Cabdalla, 2017).

7. Gabaggabo

Waxaan ku soo gunaanadaya, habdhigaalka af soomaaligu wuxuu ku hormari karaa, kuna midoobi karaa, siday ila tahay, arrimaha soo socda:

- 1) In habdhigaalka af Soomaaliga loo daayo habkii hore ee uu ku socday, haddiise wax lagu kordhinayo ama la saxayo, waxaa ila habboon in loo daayoo hawshaas dadka ahalka u ah cilmi-afeedka Soomaaliyed iyo hay'adda loo igmaday arrimaha afka.
- 2) In laga fogaado hab dhigaal salka ku haya loolanka iyo caadifadda afguriga.
- 3) In afka laga ilaaliyo wax alla wixii ka horimanaya geeddisocodka midaynta hab dhigaalkiisa, sida:
 - a) Wax ku kordhinta ama wax ka beddelidda hab dhigaalkii hore ee hirgalay
 - b) Kala duwanaanta adeegsiga qaababka shaqallada iyo shibbanayaasha
 - c) Higgaadda aan laga fiirsanin ee qaldan
 - d) Xariijin ku kala googooynta badan ee ereyada lammaanan ee aan loo baahnayn
 - e) Kala googooynta ereyada qaarkood, ee aan waafaqsanayn habka maanta loogu hadlo af Soomaaliga.
- 4) Ugu dambaynti, waxaan ku talin lahaa in la caadaysto adeegsiga qaamuusyada Soomaaliyed (Yaasiin Cismaan Keenadiid 1976; Khaalid Cali Guul Warsame 2008; Annarita Puglielli & Cabdalla Cumar Mansuur 2012; Aadan Xasan Aadan 2013), kuwaas oo wax badan ka tari kara xagga midaynta hab dhigaalka iyo higgaaddaba.

Tilmaamo

- ¹ Wuxaan aad uga mahadnaqayaa aqooniyahannadii gacan igu siiyay diyaarinta qoraalkan, oo ay ka mid yihiin barayaashan jaamacadeed: Giogio Banti, Cabdirashiid Maxamad Ismaaciil iyo Mustafa Fayruus.
- ² Ereyga ‘*Kaddib*’ in qaabkan loo qoro waxaan ka soo xigtay, oo hortay adeegsaday, aqooniyahan Yaasiin Cusmaan Keenadiid (1976: xvi).
- ³ Ereygan, Inkastoo dadku ay adeegsadaan labadiisa qaabba (‘qalad’ & ‘khalad’), haddana waxaa ila habboon in la qaato qaabka ‘qalad’, sida ku xusan qaamuusyada Soomaaliyeed ee ilaa maanta la sameeyay).
- ⁴ Gaar ahaan ereyga ‘bandhigga’, markaad eegto TV-yada, waxaa ku badan adeegsigiisa xagga higgaadda ka qaldan; ‘bandhiga’ (waa fal).
- ⁵ Sida qurub diiradeedka (baa/ayaa, waa) iyo magacuyaalka dhiman ee yeelaha ah (*aan, aad, uu ay iwm*) ay isu dhexgelayaan (*ayaad <ayaa+aad, wuu<waa+uu*) ayaa magacuyaallada layeelahah ah iyo horyaalladu isu qabsadaan. Tus.: *Arrintan mar hore ayaan kaaga digay (ka+u+ka digay; War cusub buu noola yimid (na+u+la yimid)*. Sidaa oo kale ayaa magacyada iyo magacuyaal lahaansho isu qabsadaan. Tus.: *buuggayga < buug+kay+ga*.
- ⁶ Sida ku xusan buugga Xaaji Raabi (1977:11).
- ⁷ Mowduucan kala saaridda afka guud iyo lahjadaha si gaar ah ayaan mar kale u falanqayn doonaa, hadduu Alle idmo

Raadraac

Abdalla Omar Mansur & A. Puglielli. (1999). *Barashada Naxawaha Af Soomaliga*. London HAAN Publisher, 1999. Daabacaadda 2aad, Loohpress, London, 2018

Cabdalla Cumar Mansuur. (1977). *Astaamaha Guud ee Maansada Soomaaliyeed*, Muqdisho, 1977. Daabacaadda 2aad, Loohpress, 2018.

Cabdalla Cumar Mansuur. (2015). “*Language Loyalty; The case of Somali Language*”, The 12th congress of the Somali Studies:

Midaynta Hab Dhigaalka Af Soomaaliga

International Association (SSIA) Helsinki, Finland, (ed) Afrikan Sarvi, Horn of African Journal, 2015.

Cabdalla Cumar Mansuur. (2015). “*Midaynta iyo Horumarinta af Soomaaliga*” oo ku qoran buugga *Afmaal*, Diraasaadkii Xuska 40 guuradii Qorista af Soomaaliga, 2012, (tifaf.) Cabdirashiid M. Ismaaciil, Cabdalla C. Mansuur, Saynab A. Sharci, , bb. 17-35, Jabuuti, 2015.

Cabdalla Cumar Mansuur. (2017). “*Toosinta iyo casriyaynta haybta shakhsiga Soomaaliyeed*”. Somali Studies: A Peer-Reviewed Academic Journal for Somali Studies, Volume 2, pp. 125-140, Mogadishu, 2017.

Giorgio Banti & Abdirashiid M. Ismalil. (2014). “*Some issues in Somali orthography*” ku qoran buugga *Afmaal*, (tifaf.) Cabdirashiid M. Ismaaciil, Cabdalla C. Mansuur, Saynab A. Sharci, , bog. 17-35, Jabuuti, 2014.

<https://it.wikipedia.org/wiki/Alfabeto>

Maxamed Xaaji Xuseen Raabi. (1977). *Habka Qoraalka*, Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed, Kulliyadda Waxbarashada ee Lafoole, 1977.

Mustafa Cabdillaahi Fayruus. (2015). “*Isrogrogidda Falka Af Soomaaliga : Aragti ku aadan Midaynta Qoraalkiisa*” oo ku qoran buugga *Afmaal*, Diraasaadkii Xuska 40guuradii Qorista af Soomaaliga, 2012, (tifaf.) Cabdirashiid M. Ismaaciil, Cabdalla C. Mansuur, Saynab A. Sharci, bb. 49-60, Jabuuti, 2015.

Puglielli A. & Cabdalla Cumar mansuur. (2012). *Qaamuuska af Soomaaliga*, 945 bog, Universita’ degli Studi Roma Tre, *Roma-TrE-PRESS*, 2012. Daabacaadda 2aad, Loohpress, London, 2017.

Yaasiin C. Keenediid. (1976). *Qaamuuska Af-Soomaaliga*, Firenze, 1976.

About the Author

Cabdalla Cumar Mansuur, PhD, [Abdalla Omar Mansur] a Professor of Arabic and Somali languages at the Università Roma Tre. He is also a researcher at the Centro Studi Somali (Università Roma Tre). He taught linguistics at Somali National University (1976-1990). He has published and co-published several books including “*Taariikhda Afka iyo Bulshada Soomaaliyeed*” (2016, 2nd ed.), “*Qaamuuska Af Soomaaliga*” (2017, 2nd ed.), co-editor with Professor Annarita Puglielli; “*Afafka Bahda Kushitigga iyo Taariikhda Af Soomaaliga*” (1981). He also published several articles and delivered papers in different occasions and conferences. He is a member of several research institutions and an advisor to several academic journals.

About this Journal

Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies is a broad scope multidisciplinary academic journal devotes to Somali studies; published annually by the Institute for Somali Studies in print and online forms. **Somali Studies** aims to promote a scholarly understanding of Somalia, the Horn of Africa and the Somali diaspora communities around the globe. Special consideration will be given to issues which are critical to the recovery and rebuilding of Somalia, a country emerging from a devastating civil war. **Somali Studies** is open access journal and all articles are freely available to read, print and download from the website of the institute, www.isos.so.

Disclaimer: All views and opinions expressed in the article(s) published in *Somali Studies: A peer-reviewed academic journal for Somali studies* are the sole responsibility of author(s) of the article(s). It does not necessarily reflect those of the editors, the Journal, nor the Institute for Somali Studies.

Published by Institute for Somali Studies

Hodan District, Near Km4 Square

Website: www.isos.so

Email: isos@mu.edu.so

Tel/Fax: +252 1 858118

Mogadishu, Somalia